



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA JANAAYO 2024



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Janaayo 2024 ayaa gaaray 142.28, marka la barbardhigo 143.57 bishii Diseembar 2023.

Isbedel bileedka, Janaayo 2024, marka la barbar dhigo Diseembar 2023, ayaa sare u kacay -0.90 boqolkiiba. Majirin isbedel la taaban karo bishii Janaayo.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Janaayo 2023 iyo Janaayo 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 6.19 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.60 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Diseembar 2023 iyo Diseembar 2023.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Janaayo 2024 (Dec 2014 = 100)


| Tusaha Sicirka Badeecadaha, Janaayo 2024                 |        |
|--|--------|
| Tusaha bishan (Janaayo 2024)                             | 142.28 |
| Tusaha bishii hore (Diseembar 2023)                      | 143.57 |
| Tusaha sanadkii hore (Janaayo 2023)                      | 133.99 |
| Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %                         | -0.90% |
| Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba % | 6.19%  |

### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12billood.

### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiya, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Janaayo 2024

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Janaayo 2024

Heerka sicir-bararka bisha Janaayo 2024waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2023 iyo Janaayo 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 6.19 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Janaayo 2023 iyo Janaayo 2024, marka labar bardhigo 7.60 boqolkiiba 12kii bilood, Diseembar 2022 iyo Diseembar 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Janaayo 2024 ayaa sameeyey sare u kac dhan -0.90 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Janaayo 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -0.32 boqolkiiba, bishii Janaayo 2024marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -2.24 boqolkiiba bishii Diseembar 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.01 boqolkiiba bishii Janaayo 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.01 boqolkiiba Diseembar 2023.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaan isbedel bille ahaa hoos u dhacay -3.01 boqolkiiba Janaayo 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 12.49 boqolkiiba Janaayo 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo ahaa 15.98 boqolkiiba ee Diseembar 2023.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la doortay.

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

### A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Janaayo 2024(Dec 2014 = 100)



#### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkolkiiba bishii Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 40.02 boqolkiib bishii Janaayo 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+62.50 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 13.28 boqolkiiba Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+15.68 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+30.60 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 12.49 boqolkolkiiba bishii Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada & Gaaska (+19.40 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.98 boqolkolkiiba bishii Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+33.17 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 9.81 boqolkiiba Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+14.65 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 9.04 boqolkiiba Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+18.82 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia


- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba, bishii Janaayo 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+18.52 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.20 boqolkiiba bishii Janaayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+4.97 boqolkiiba).

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Janaayo 2024(-)

- Ma jirin isbeddel muuqda ee Sanadkan Janaayo.

### B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Janaayo 2024 (Dec 2014 = 100)**



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Janaayo 2024(+)

- Ma jirin isbeddel muuqda ee bishan Janaayo.

### Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah -3.01 boqolkiiba bishii Janaayo 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, Gaaska & shidaalka kale (-7.95 boqolkiiba).

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Janaayo 2024ee habka (COICOP)

| Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP               | TSB Weight | Janaayo 2023 TSB | Diseembar 2023 TSB | Janaayo 2023 TSB | % Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore | % Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan |
|---|------------|------------------|--------------------|------------------|--------------------------------------|--|
| <b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>                          | 100.00     | 133.99           | 143.57             | 142.28           | -0.90                                | 6.19   |
| Cuntada & Cabitaanada                               | 46.04      | 142.32           | 141.32             | 140.88           | -0.32                                | -1.01  |
| Tubaakadda  | 1.25       | 124.13           | 173.80             | 173.80           | 0.00                                 | 40.02  |
| Dharka & Kabaha                                     | 5.03       | 149.71           | 169.78             | 169.59           | -0.11                                | 13.28  |
| Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale | 23.41      | 124.46           | 144.35             | 140.00           | -3.01                                | 12.49  |
| Agabka Guryaha                                      | 2.93       | 109.38           | 119.27             | 119.27           | 0.00                                 | 9.04   |
| Caafimaadka   | 5.00       | 172.91           | 182.78             | 182.78           | 0.00                                 | 5.71   |
| Gaadiidka   | 3.77       | 109.71           | 122.21             | 120.66           | -1.27                                | 9.98   |
| Isgaarsiinta  | 2.80       | 103.03           | 166.78             | 166.78           | 0.00                                 | 61.87  |
| Hawo Bedeleshada & Dhaqanka                         | 1.00       | 103.85           | 104.30             | 104.30           | 0.00                                 | 0.43   |
| Tacliinta   | 4.00       | 109.11           | 116.95             | 116.95           | 0.00                                 | 7.18   |
| Maqaayadaha & Hoteelada                             | 2.00       | 145.78           | 150.45             | 150.45           | 0.00                                 | 3.20   |
| Alaabaha Yaryar & Adeegyada                         | 2.77       | 110.56           | 121.41             | 121.41           | 0.00                                 | 9.81   |

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Febraayo, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Maarso, 2024. Wixii faahfaahinta dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Janaayo 2024 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Janaayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia